# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

### Kal-fadhigii 42aad Fadhigii 2aad

**Isniin 17 February 2020**

**Quraanka: -** Md Xaamud Cismaan

**Gudoonka: -** Gudoomiye Md.  Axmed-yaasiin Sh. Cali Ayaanle

**Ajandaha Fadhiga:-** Dooda Ajendaha kalfadhiga 42aad

**Gudoomiyaha: -** Mudanayaal waxaynu u balan sanayn dooda ajendaha kalfadhiga 42aad, mudanayaasha doonaya inay dooda ka qayb qaataan ha is qoraan.

**Guddoomiyaha:** Waxaan ku soo dhawaynayaa:

**Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf (2min 10sec):-** Shir-gudoon iyo Mudanayaal ASC, anigu waxaan ka hadlayaa hal qodob oo ah:-

**Xeerka Kufsiga**, Xeerkaasi wuu inagu soo noqnoqday, arrintana waxa cadeeyay Kitaabka iyo sunaha, wax la hawl-yareysan karo maaha, arrintuna miyiga iyo magaalada si isku mid ah bay uga dhacaysaa, shareecadana maraaxil faro badan bay soo martay islaamka ka hor iyo ka diba, iminka wax badan la isma waydiiyo markay dhacdo inanta magteeduun baa la iswaydiiyaa, wayna badan tahay oo qof qof maahee waa darsino iyo kooxo, marka anigu waxaan soo jeedinayaa Inaynu Wasaaraada Diinta iyo Awqaafta nidhaahno wixii shareecada diintu ka qabto keena oo meesha aynu ku darno ama madaxweynaha xagiisa ha ka timaadee, markay Wasaaradda Diintu ku soo dartona inagu gacanta u taagno oo ansixino.

**Md. Ibraahim Mahdi Buubaa (3min 05sec):-** Shir-gudoon, Mudanayaasha, Saxaafada iyo shaqaalahaba marka hore waan idin salaamaya, anigu ajandahan ina horyaal saddex qodob baan wax ka badali lahaa kuwaas oo kala ah.

**Qiimeyanta iyo xog ogaal u noqoshada xaalada dalka** ayaan soo jeedinayaa in lagu daro oo qodobka 2aad laga dhigo Warbixinta Shir-gudoonka iyo Gudiyadda marka laga baxo.

**Wax ka-badalka Xeerka la-dagaalanka iyo ka-hortaga kufsiga**, Xeerkaasi dhowaan baan ansixino, marka may gaadhin xili wax ka badal lagu sameeyo oo lagu shaqeeyo, waayo xeerka marka la dabaqo ee lagu shaqeeyo ayaa caqabadihiisu soo bixi karaan, marka sharci waxaan qabaa inay khalad tahay in deg-deg wax ka badal loogu sameeya iyadoon lagu shaqeyn, marka xeerkaa sidiisii ha loo daayo ilaa iyo inta lagu shaqeynayo oo

caqabado wax ka badal loogu sameeyo ay imanayso, marka waxan soo jeedinayaa in laga saaro ajandaha oo sidiisii lagu dhaqangaliyo.

**Xeerka Caasimada,** anigu halka Xeerka kufsiga ayaan soo jeedinayaa in lagu badalo Xeerka Caasimada, markaa Xeerkaas aad baa loogu baaahan yahay, Madaxweynaha iyo Golaha Deegaanku ha ka soo shaqeeyaan oo Xeerkaas ha hirgalinayaan inagu halka aynu galino oo ansixino.

**Md. Axmed Maxamed Nuur (2min 58sec):-** Shir-gudoonka, Mudanayaal, marti-sharafta iyo dhamaantiinba waxaan idinku salaamayaa salaanta islaamka, Gudoomiye anigu ajanadaha guud ahaan wuxuunba ku soo darayaa.

**Xog-ogaal u noqoshada xaalada dalka** sida Xildhibaan Ibraahim sheegay in lagu daro ayaan la qabaa oo qodobka saddexaad baan ka dhigayaa, waayo maanta xaalkayguna marayno ayaynu wada ognahay oo waxaynu marayno afkii baa juuqda gabay, waynu ognahay Madaxweyne Muuse wuxuu la kulmay Farmaajo, arrimahaasi wax la fududeysan karo maaha, xaalkii la soo marayna waynu ognahay waliba inteena waaweyni iyo wixii dhibaato ka dhashay, marka maaha wax nin kaliya ahi jeebka ku rito, marka waxaan soo jeedinayaa in arrintaas laga doodo, laga hadlo aad iyo aadna awood ha la oo saaro.

**Xeerka Saxaafada**, Xeerka saxaafada in badan baynu maqlaynay, dhibaatada saxaafada lagu hayo waynu ognahay, marka waxan soo jeedinayaa in Xeerka Saxaafada lagu soo daro Ajanadaha.

**Md. Xuseen Maxamed Cigee (5min 30sec):-** Gudoomiye iyo Mudanayaal marka hore waan idin salaamayaa, anigu waxaan:-

Marka waxaan mudanayaal hore ku raacsanahay **Qiimeynta Xaalada dalka** oo laga dhiga Qodobka labaad ee ajandaha, marka in qiimeynta xaalada dalka laga hadlaa anigu lagama maarmaan baan u arkaa.

**Xeerka Caasimaada,** Xeerkaas Caasimada oo laba Ibraahimba ka hadleen, anigu waxaan qabaa Caasimadu inay Gobolka Maroodi-jeex intiisa kale ka hadhaa waa muhiim, marka waa in la ogaalaada Xeerka Caasimada oo caasimadu dadka ka dhaxaysaa, Doorashooyinkii ina soo maray siiba tii Golaha Deegaanka dee dad aan reer Hargeysa ahayn baa iska sharaxay oo ka soo baxay, loo diidi maayo oo muwaadiniinta qofkasta meeshu ka doono inuu dalka ka dago dastuurka waajibiyay, xuquuqdiisa meeshu dego ku helo, marka qofka gobolka u shisheeya ka yimaada haduu Hargeysa dego waa ka muwaadin la siman muwadinkii joogay, marka wax badan khaldamayaa hadii caasimadu caasimaduu gobolkana ahaato degmooyinkiisana qaarna laga gooyo qaarna ku soo arooraan waa khalad wayn, buurta Qalax ee xaga kantroolka ka xigta wixii ka shisheeya doorashada Golaha Deegaanku ma saameyso ee waa la rarayaa oo Baligubadle

ayaa loo celinayaa, meel qaarkoodna ilaa bad Hargeysay ku soo aroorayaan, markaa Xeerkaasi wax badan buu saxayaaye umadu si xuquuq siman u hesho waa in Caasimadaasi Xeerkaas heshaa oo noqotaa mid dadka ka dhaxaysa, marka Ajandaha ha lagu soo daro oo intaan doorashoba la gaadhin waa in la keenaa.

**Xeerka Saaxafada,** wax badan Xeerkaas saxaafada waxa khalad ka yimaada xuquuqda hadalka iyo xuquuqda saxafiga, xeerarka hada lagu xukumaana waa Xeerarkii jamahuuriyadii somaliya la odhan jiray la kawsaday weeye, waa xeerar wakhitgoodii laga tagay, anigu waxaan qabaa in saxaafada loo badalo nidaamka madaniga ah oo ciddii uu meel kaga dhacaa magdhow waydiisato ama sharaf ha noqote la qiimeeyo magdhow sharafeed, caalamku siduu hada u socda tahay in saxaafadu ciqaabtoodu madani tahay, marka waxan soo jeedinayaa Saxaafada xeerka ciqaabta lala doonanayo aynu ka saarno oo nidaam madani ah aynu u rogno oo Xeerkaas isna aynu de-dejino imaatinkiisa.

**Xisaab Xidhka 2018ka,** Xisaab xidhka ina horyaal waa 2018kii, saddex ama afar bilood ka dib waxa la galayaa diyaarinta Miisaaniyada sanadka 2021ka, diyaarinta Miisaaniyadu waa inay ka shidaal qaadataa xisaab xidhka sanadkii ka horeeyay, anigu waxaan qabaa sanad dhan oo dib u dhaca baa jira, xisaab xidhka inoo iman lahaa hada wuxuu xisaab xidhkii sanadka 2019ka si 2021ka looga tilmaan qaato, marka dee dib u dhacaas yaan lagu jirin Wasaaraddaha iyo hay'addaha ku shaqada leh shir-gudoonka iyo gudiyada ku shaqada lihi ha dabagalaano si hawshu isu waafaqdo markan mid cusub sameynayno kii ka horeeyay ha laga shidaal qaato yaana sidan kale kii kal saddexaad laga shidaal qaadanin, marka hawshaas Shir-gudoonka iyo gudiyada u xilsaaranin ha ka shaqeeyaan.

**Wax ka badalka Xeerarka,** waxaan intaa raacinayaa marku inoo yimaado xeerka wax ka badal lagu samaynayo yaana xeer isku dhan oo cusub oo wixii wax laga badalayo oo cusub iyo intii kale aan kala sheegayn la iskama keeno, marka halkaa wax hab-dhaqankeeda aynu wax ka badalno oo marka Xeer wax laga badalayo inta amendment-ga uun ha la keeno ee yaan qodobadii oo dhan la keenin

**Md. Cabdiqaadir Jaamac Xaamud** **(4min 5sec):-** Dhamaan Shirgudoonka, Mudanayaasha, Saxaafada dhamaan waan idin saalamaya, Si fiican bay usoo qoren sifiicana wuu u qaabaysan yahay Xeerka hada ka hor waynu ansixinay laakin wuxu ku dari karayo wuu ku daray sababahaas baan umalaynayaa magacaabis in wax ka badal loogu sameeyo markaa inuu sidiisa Ajendaha ugu jiro baan jecelahay oo laga dhaqmo oo wixii Extra ee ka hor imanaya laga saaro.

Qodobkan kale Xeerka Haya'adda Caymiska Qaranka Anigu hal Qodob baan kusoo darayaa oo ah Xeerka la dagaaalanka Qabyaalada Xeerkaasi waa Xeer muhiim ah oo loo baahan yahay markaa xeerkan baan kuso kordhinlahaa, Xeerka ah isaguna Qabyo

_qoraalka Xeerka Sahaminta shidaalka taana waxa muhiim utahay dalka waxaan so jeedinlahaa in halka hore la soo mariyo inahaas baan kuso kordhinaya.

**Md. Xuseen Axmed Caydiid** **(5 min 10 sec):-** Bismilaah, Kolay saaka waxa laga doodaya waa Ajendihii Qodobkaa Labaad ee Mashariicda Sharci ee Golaha horyaala sida Guddida Qiimaynta xaalada Dalka hadhowna waxa marka aynu Xeerka Caasimada ka hadlayno ee Xildhibaanadii iga horeeyayba iskaga daba hadleen, marka aynu xeerka Caasimada leenahay gudoominbay Golaha u soconaysa Gobolada intiisa kale,Markaa ninki doonaya Gobolnimo Caasimada haka ahaato horta waa inuu noqdaa Xeerkaasi Caasimada noqon lahayd tii dadka ka dhaxaysay,Een doorashooyinkii imika laso maray siiba tii Golaha Deegaanka, dadka isa soo sharaxaya, Muwaadinka meesha u dalka ka maro kana dago Dastuurka waafajiyay. Markaa hadii u muwaadin meel fog ka yimaada oo Hagaysa yimaado waa muwaadin la siman muwaadinkii kale ee dalka joogay.

Markaa waxaan leeyahay xaga waxa badan baa runtii khaldanaanaya hadii ay Caasimaduna Caasimad Gobol un ahaato Gobolka degmooyinkiisana qaarna laga gooyo qaarna ilaa Caasimada ku soo arooraan khalad ayaa kajira, Buurta Qalax ee Kaantaroolku yaalo e 5km inoo jirta wixii xagaa ka xiga doorashada Golaha Degaanka laguma so daro waa la laalaya ama la rarayaa oo bali gubadle lagu celinayaa iyo qaarkale dorashoodu ilaa caasimad si toosa u imanayso halkaa cadaaladddaro wayn ayaa ka jirta.

Waxaan leeyahay Xeerka Caasimada waxabadan buu saxaya oo dadkuna Xuquuq siman u hesho waa in Xeerka gooniya ama 30km ha ahaato oo dhan ama wixii la doono halaga dhigee caasimadaasi waa inay noqotaa mid dadkii ka dhaxaysa markaa taa waxaan odhan lahaa aan soo galino xeerka caasimada shirgudoonku ha ansixiyaan markaa waxa leeyahay intaan doorashooyinka la gaadhin xeerka hala dooro Ayaan leeyahay.

Waxaa kale oo dhib wayni ka taagan tahay xagii saxaafada waxbadan baa ka siya xaga Saxaafada dhib badan kaga yimaadan waxay ila tahay xeerarkii la keenay yaalay..... waa xeerarkii ku dewledihii Somali la odhan jiray weeyan **50 sanno** weeye waa xeerar wakhtigoodi laga tagay inkastoo uu meelo ka wajiilayo xeerka in aan qof saaxafada la xidhi Karin hadii aan waaran maxkamadeed loo soo qaadan

Hadana marka loo so qaado waaran maxakameed wuxu jidaynaya qoralku inay dacwad ciqaabeed inay Meesha taalo. Saxafada ka mida in loo badalo nidaamkii madaniga ahaa oo cidii uu dambi ka dhaco ama sharci ha noqoto ama waxakale hana noqotee magdhowyo iyo waxyaabo kale inuu bixiyo oo dusha laga saaro oo ninka Saxafiga ah ama Wargeyska ah ama Warbaahinyta ah.

Waxaa kale oo runtii iyadana waxka odhanaya Xisaabxidhka **2018** saddex ama afarbilood ka bacdi waxay samaynayaan diyaarinta Misaaniyada **2021**, diyaarintaa misaaniyaduna waa in ay ka shidaal qaadataa tii Xisaaab xidhkii sannadkii ka horeeyay ee **2019 a**nigu halkaa waxaan qabaa sannad wayn o dib udhaca misaaniayada waxay noqoto tii 2019 si

odoroska misaaaniyada ee 2021 looga shidaal qaadano waxaan odhan lahaa halka dib udhacaas yaan lagu jirine Wasaarada iyo Haya'adaha ku shaqada leh iyo sirgudoonku iyo Guddiyada ku shaqada leh wax halala qabto si ay hawshu isu waafaqdo oo wixii ino soo baxay iyo waxa qabyada ah aynu isku wadno taana waxaan leeyahay qoloda ku xilsaarani ha iska xilsaraan waxaan kalo raacinaya xeerarka shirgudoonka wax ka badal halagu sameeyo. Golaha xeer cusub oo isku dhan oo wixii cusbaa hore aan kala shaan dhaynayn dib Golaheena halaga wada hadlo.

waxaan kale oo u sheegaya Articleyada inay aan laso gudbin ama sidii hore ahaadan **Ametment-ka** wax laga yidhaahdaa xeerdhan layskama dumiyode oo aan lakala shaandhaynayn wixii hore iyo waxan cusub waxaan leeyahay habdhaqaankeena anu badalno oo aynu la nimaadno marka xeer lagu sheego waxka badal xeer qodabada wax lagaga badalayo Guddidu ha keento intiisa kalena oo si horena haku ahaado.

**Md. Ibraahim Carraale Cabdi** **(3min 10sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka, Mudanayaasha iyo saxaafada waan salaamayaa. Halkan waxa ku jira laba xeer oo labaduba ka yimid Guddida Arrimaha Guddaha. Waa Xeerka la Dagaalanka Mukhaadaraadka iyo Xeerka Xakamaynta ka Ganacsiga Tahriibka.

Labaad xeer waxaan soo jeedinayaa in hal xeer laga dhigo waxaanan u daynayaa halka ay ku jiraan. Xeerka caasimadu ajendaha ma soo gali karo ilaa la dhamaystiro xeerarka ka horeeya, sida kala xadaynta Gobolada iyo Degmooyinka. Marka intaa la sameeyo ee dadka Caasimada degani helaan Gobola ayey caasimada noqonaysaa.

Waxaan leeyahay xildhibaanada halkan fadhiyaa waa Qaranka oo dhan dalkuna maaha oo kaliya Caasimada, meeshana ma leeka Madaxweyne, Maayir iyo ku xigeen reer Hargeisa ah ayaa meesha jooga, Waxaan leeyahay dalku Hargeisa oo kaliya maaha inaga oo ogayn in Caasimadii wax kasta noqotay oo Miisaaniyaddii aanay dhaafayn ma leeka hadalkaasi meesha. Waxaana leeyahay xeerkaa meesha ma soo gali karo.

Waxaan leeyahay xeerarka kale sida ay ugu jiraan Ajendaha ee loo kala horaysiiyey ha loo daayo, iyada oo labadaas xeer ee aan soo sheegay Iyana la isku daraayo.

**Md. Maxamuud Axmed Obsiiye** **(4min 10sec):-** Runtii waxaan ku bilaabayaa marka ugu horeysa qaabka qoraalka loo soo gudbiyay ee Ajendaha Kalfadhiga 42aad ee Golaha Wakiilada waxa iiga muuqata qaab cusub oo imika loo dhigay oo aan isleeyahay waxay khillafsantahay Dastuurka iyo Shuruucda u yaala Dalka.Waxa lasoo jeediyay magaca xeerka marka la qoray marxalada uu marayo Madaxweynaha soo celiyaybaa lagu qoray waa xeer madaxweynaha soo celiyay Madaxweynuhu wuxu soo celiin leeyahay mashrruc sharci marka uu ka gudbo Golaha Wakiilada uu ka yimaaado Golaha Guurtida ka bacdina Golaha Wakiiladu ay dib u ansixiyaan 21 cisho gudaheeda sida Dastuurku dhigayo ayuu xaq uleeyahay inuu so celiyo soo celintaasi marka waxa weeye xaqbuu uleeyahay Dastuurkaana siiyay laakiiin xeerka dhaqan galay oo hawlgalay een

Amentment hadii uu ku samaynayo Golaha Xukuumada ayuu kasoo ansixinayaa isaguna Madaxweyne ayuu kusoo saxeexaya habka ugu horaysaana sidaas ah laakin qaabka ay Xukuumadu ay ukeento way wanaagsanyahay  Madaxweynuhu wuxuu mashruuc shacri u leeyahay xaq **21 cisho**. Waxka badalka iyo kaabista waa inuu Golaha Wasiirada soo maro ka dibna uu Xukuumada usoo gudbo.

Xeerka waxka badalka maamuuska Madaxweynaha wuxu ku qoranyahay Gole weynuhu u yaala waxay ahyd Guddidii ku shaqo lahayd inuu soo maro. Waxa kale oo Xildhibaanada ku taageersanahay in wixii xeerar ee so kordha in lagu daro xaga hore, in qudbada Madaxweynaha markaynu dhagaysano in laga hadlo xaalada dalka.

**Xeerka Caasimada waa in Ajendaha lagu soo daro** waxaan aaminsanahay xeer xadidaya caasimada dadkuna ka simanyihiin waana inay kala baxaan Maroodi Jeex Caasimaduna mid noqoto.

**Md. Ibraahim Axmed Raygal** **(6min 30sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Mudane Guddoomiye ajendaha waxaan u kala qaybinayaa saddex qaybood.

**Qaybtaa koowaad** oo ahaan jirtay warbixinta shir-guddoonka iyo Guddiyada in aynu sideeda ugu horaysiino.

**Qaybta labaad** xeerarka Golaha yaala oo afar ah sida Xeerka Nidaamka Garsoorka, Xeerka maamuuska Madaxweynaha iyo Baarlamaanka, Xeerka la dagaalanka Mukhaadaraadka oo lala mideeyo xeerka Tahriibta iyo Xeerka Tamarta. Waxaan leeyahay xeerarka Golaha yaala ha la soo horaysiiyo.

**Qaybta saddexaad** xeerarku waxay ku xidhan yihiin siday uga soo gudbaan Guddiyada. Waxa kale ee soo kordha waxaan jeclaan lahaa in lagaga hadlo xaalada dalka sida caafimaadka, Waxbarshada iyo dhaqaalaha oo aynu hoosta ka xidhano oo iska waraysano xaalada guud ee dalka. Waxaan odhan lahaa sidoo kale, waa in aynu ka hadalnaa waxan social media ku soo kordhay oo ah in qofka sharaf dil lagu sameeyo, iyada oo adduunka xeerar ka yaalaa. Sidoo kale ka Gole ahaan waa in aynu isa saxnaa oo Guddiyo iyo shir-guddoonba wax isku sheegnaa kana wada hadalnaa sidii aynu shaqadeena u wanaajin lahayn. Waanan ka baxay Guddoomiye

**Md. Maxamuud Ismaaciil Xasan** **(3min10sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Alhamdulilah Waa Salaatu Wasalaamu Calaa Rasuulilahi Salalu Calayhi Wasalam. Mudanayaasha iyo shir-guddoonka waxaan idinku salaamayaa salaanta islaamka Asalaamu calaykum Warax Matulaahi Wa Barakaatu. Guddoomiye ajanduhu waxa uu ka kooban yahay kuwo Golaha yaalay, kuwo la soo celiyo iyo kuwo cusub. Waxaan jecelahay in xeerarku siday u kala mudan yihiin iyo saamaynta ay bulshada ku leeyihiin loo kala hormariyo. Waxaan leeyahay ha la soo horumariyo.

- Xeerka ka ganacsiga iyo Tahriibta waayo waa xeerar muhiimadooda leh waxaan leeyahay waa in 2aad laga dhigaa.
- Xeerka la dagaalanka mukhaadiraadka waa mid bulshada ku soo batay oo khatar leh, waxaan leeyahay 3aad ha la dhigo.
- Waxaan leeyahay xeerka Caymisku waa xeer muhiim ah isna ha la soo horumariyo ayaan leeyahay oo 4aad ha laga dhigo.
- Xeerka caasimada haddii aynaan samayn dhibkeeda ayey leedahay, waxaan leeyahay xeerkaasi wuu inagu raagay ajendaha ha lagu soo darro waa in laga hadlaa. 1 seconded

Waxaan leeyahay qiimaynta xaalada dalka oo aan loo baahnayn in la iska hadlo, waayo labadii kalfadhi ee hore waynu ka hadalnay wax macno leh oo ay samaysayna ma jirto, waxaan leeyahay yaan lagu soo darin ee ha laga saaro.

**Md. Maxamed Faarax Qabile** **(4min 10sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Waxaan leeyahay xeerka sida xildhibaankaa iga horeeyey sheegay mudnaanta ha loo kala siiyo. Somaliland waxa la soo gudboonaatay arrin adag oo aan hore u soo marrin. In badan ayaa wada hadalka Somaliland iyo Somalia socday isaga oo meelo badan lagu soo qabtay. Tani 360 degree ayey Somaliland wareegtay. Waxaanay ka dambaysay kulankii Madaxweyne Biixi iyo Farmaajo oo uu dabada ka riixayo Abey Axmed. Inta badan madaxweynuhu arrimo gaar ah oo khuseeya arrimaha dhaqaalaha iyo arrimaha bulshada. Waxay ahayd in Madaxweynuhu ka hadlo arrimaha soo kordha, laakiin waxaan leeyahay waa in mudanayaasha wakhti loo siiyaa si Madaxweynaha su'aalo loo waydiiyo, waa in aad isku wargelisaan labadiina Shirguddoon ee Barlamaanku.

**Md. Xaamud Cismaan Cigaal** **(3min 20sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka, Mudanayaasha iyo saxaafada. Waxaan leeyahay **xeerka Doorashada ee ajendaha xaga dambe kaga jira ha la soo horaysiiyo**, waayo dadkii ayaa leh doorasho ma doonaysaan haddii aad tihiin Golaha Wakiiladda. **Waxa kale oo jira afar xeer oo Golaha yaala iyo ka caymiska ha la soo horaysiiyo**. Waxa bisha saddexaad la bilaabayaa MOT gawaadhida la marinayo. Taasi ma dhici karto in la sameeyo iyada oo xeerkii caymisku aanu jirin. Waxaan leeyahay waa in xeerka caymisku xaga hore yimaadaa. **Iyana waxaan leeyahay saddex xeer Madaxweynaha ka soo noqday xaga hore ha la soo mariyo.** Waxaan leeyahay xeerarka aynu hayno aynu ka saarno ajendaha oo inaga oo kii hore dhamayn yeynaan mid kale bilaabin.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda H/Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl** |
| ______________________ | ______________________ |